



# QAADO TALLAALKA COVID-19 EE LA CUSBOONAYSIIYAY SANADKA 2023-2024

Hay'adda CDC waxay ku talinaysaa in qof kasta oo jira 6 bilood iyo wixii ka weyn tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyey. Sedex tallaalka ayaa diyaar ah: Pfizer, Moderna ama Novavax (12 jir iyo wixii ka weyn) oo waxay dhammaantood ka hortagaan xanuunka daran ee COVID-19.

Ma jiro tallaalka si gooni ah lagu taliyey in la qaato. Waa inaad qaadatay tallaalka diyaarka kuu ah oo da'daada ku habboon. Waa caadi inaad qaadatid tallaalka kale oo ka duwan kuurooyinka aad horay u qaadatay.

| DA'DA 6 BILOOD<br>ILAA 4 SANO                                                                                                                                                             | DA'DA 5 ILAA<br>11 SANO                                 | DA'DA 12 IYO<br>WIXII KA WEYN                                                                                                                                                                                       | DA'DA 12 IYO<br>WIXII KA WEYN                                                      |
|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------------------------------|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|------------------------------------------------------------------------------------|
| Ugu yaraan<br><b>1</b><br>kuuro oo ah tallaalka<br>COVID-19 ee la<br>cusboonaysiiyay<br><br>(waxaa laga yaabaa<br>inaad u baahato<br>kuurooyin badan<br>oo ah kuwa la<br>cusboonaysiiyay) | <b>1</b><br>tallaalka COVID-19<br>ee la cusboonaysiiyay | <b>AAN LA TALLAALIN</b><br><br><b>1</b> tallaalka Pfizer ee la<br>cusboonaysiiyay ama<br>tallaalka Moderna ee<br>COVID-19<br><b>AMA</b><br><b>2</b> kuuro oo ah nooca<br>tallaalka Novavax ee<br>la cusboonaysiiyay | <b>LA TALLAALAY</b><br><br><b>1</b><br>tallaalka COVID-19<br>ee la cusboonaysiiyay |

Fayraska sababa COVID-19 waa mid mar kasta is beddelaya oo difaaca aad ka heshay tallaalkadii hore ee COVID-19 hoos ayuu u dhacayaa waqti kadib. Helitaanka tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay waxay soo celin kartaa difaacii waxayna keeni kartaa difaac la xoojiyey oo ka dhan ah noocyada hadda wareegaya.



Dadka jir difaacoodu dhexdhexaadka yahay ama mid aad u liita waxay heli karaan kuurooyin dheeraad ah oo ah tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay. La hadal dhakhtarkaaga.

La hadal dhakhtarkaaga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay sanadka 2023-2024, ama booqo [Xogta ku saabsan Tallaalka COVID-19 \(www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/vaccine/basics.html\)](https://www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/vaccine/basics.html) ama [CDC: La soco wixii ku soo kordha Tallaalka COVID-19 \(www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/stay-up-to-date.html\)](https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/stay-up-to-date.html) wixii macluumaad dheeri ah.